

Sida loo dalbado qoraallada dhakhtareed ee kuu oggolaanaya in aad daawooyin si joogto ah u qaadato

Waxaannu ku weyddiisaneynaa laba maalmood oo kuwa shaqada ah si aan uga baraandegno codsiyadaada qoraalka dhakhtarka ee kuu oggolaanaya in aad daawo qaadato. Haddii qoraalka dhakhtarka kuu qorey ee kuu oggolaanaya in aad daawooyin qaadato si toos ah loogu gudbiyo farmashiyaha, fadlan markaasi u oggolow waqti dheeraad ah ka hor inta aadan qaadan daawooyinka uu dhakhtarka kuu qorey.

Waxaad u codsan kartaa qoraalka dhakhtareed ee kuu oggolaanaya in aad daawooyin si joogto ah u qaadato siyaabahan soo socda:

Barta internet-ka

- **Patient Access** Booqo mareegtada Patient Access si aad isugu diiwaangeliso adeegyadooda
- **NHS App** Waxaad ku codsan kartaa qoraallo dhakhtareedka kuu oggolaanaya in aad daawooyin qaadato oo aadna ku cusbooneysiin kartaa farmashiyaha aad cayintey ama magacaawdey adiga oo adeegsanaya NHS app

Goobta Soo-dhaweynta Martida

- Ku rid warqadaha qoraallada dhakhtareed ee kuu oggolaanaya in aad daawooyin si joogto ah u qaadato sanduuqa boostada ee ku yaalla goobta soo dhaweynta martida. Foomam bannaan ayaa laga heli karaa miiska soo dhaweynta.

Farmashiyaha

- Farmashiyeyaasha qaarkood ayaa kaa caawin doonna codsiyadaada qoraal dhakhtareedka kuu oggolaanaya in aad daawooyin qaadato. Si toos ah ayaad ula xiriiri kartaa.

Boostada

- Waxaad boostada ugu soo diri kartaa warqadaha qoraallada dhakhtareed ee kuu oggolaanaya in aad daawooyin si joogto ah u qaadato qaybta qalliinka

Qoraal dhakhtareedka kuu oggolaanaya in aad daawooyinka qaadato ayaa waxaa si elektaroonig ahaan ah loogu diri doonnaa farmashiyaha aad magacaawdey.

Waa maxay qoraal dhakhtareedka kuu oggolaanaya in aad daawooyin si joogto ah u qaadato?

Marka dhakhtarka uu kuu qoro daawooyin aad u baahan tahay in aad muddo dheer qaadato waxaa lagu siin doonnaa daawooyinkaaga, oo la socota warqad kuu suuragelineysa in aad dib u dalbato daawooyinkaaga adiga oo aanan mar kale arkin dhakhtarka.